



## BUFFALO PUBLIC SCHOOLS

### Office of the Superintendent

65 Niagara Square Room #712 City Hall  
Buffalo, New York 14202

Phone (716) 816-3575 \* Fax (716) 851-3033  
krinercash@buffaloschools.org

Maarso 6, 2020

Caafimaadka iyo badbaadada bulshadeena waa mas'uuliyad aan wadaagno oo had iyo jeer ah ahmiyadeena koowaad. Sidaad ogtahay, xaalada Koronaha COVID-19 si dhakhso ah ayey isu badalaysa. Ilaa maanta, waxaan ka warqabnaa in soddon iyo saddex (33) kiisas oo fayriska koronaha la xaqiijiyey gobolkeena. Ma jiraan kiisas la xaqiijiyey oo ka jira degaanka 'Erie County' waqtigan; 116 qof ayaa ku jira karantiil iskooda u galeen ee loogu talagalay baaritaanka Koronaha.

Markaan eegno guud ahaan muuqaalka caalamiga, qaran ahaan, iyo kan maxalliga ah, waxaan ka codsaneynaa xirfadleyda caafimaadka ee maxalliga ah, kuwa deegaanka, iyo kuwa gobolka oo dhan inay bixiyaan tilmaamo cad oo faahfaahsan oo ku saabsan faafitaanka fayriskaan. Ujeedaydu waa inaan caddeeyo qawaaniinteena kala duwan ee arrintan ku saabsan oo aan muujiyo heerka u diyaargarowga iyo qorsheynta ee hadda socota haddii ay dhacdo heer bulshada uu ku dhex dillaaco. Toddobaadkan waxaan si dhow ula shaqeynayay caafimaadka maxalliga ah iyo saraakiisha waxbarashada gobolka 'NYSEd', oo ay wehelinayaan koox hoggaamiyeyaal degmo iyo aqoonyahanno ah, si aan u sii wadno qorsheyaal aan ku qaban karno sidii aan u ilaalin lahayn waxbarashada gudaha-dugsiyada Degaanka Magaalada Buffalo anagoo yareynayna faafitaanka cudurka.

Marka lagu daro gacmo dhaqidda had iyo jeer, u hogaansanaanta akhlaaqda qufaca iyo hindhisada, gacmahaaga ka fogee wajigaaga, iyo gurigaaga joog marka aad jiran tahay, waxaan cusbooneysiinay borotokollada soo socda. Gaadiidka 'First Student, Inc.' ayaa hirgaliyey borotokool heer qaran ah oo loogu talagalay badbaadada la xiriirta nadaafadda basaska jaalaha ah, Waaxda Adeegga Cuntada ayaa heegan sare ugu jirta inay raacdo habsocodka Adeegga Badbaadada Cuntada & Nadaafadda wakhti kasta, iyo tirtirayaasha jeermis dilayaasha oo awood sare leh iyo daawada nadiifinta loo yaqaana "broad-spectrum cleaning solution" oo leh aalado jeermiska ku disho 48 saacadood ayaa hadda si joogta ah loogu qaybiyaa iskuulada looguna adeegsadaa iskuuladeena iyo fasaladeena. Waxaan sii wadaynaa inaan dhisno sanduuqa aaladaha nabdoonaanta hadda ka dib. Xaashida macluumaadka ee halkan ku lifaaqan waxay muujineysaa qaabab istiraatiiji ah oo muhiim ah oo aan wax ka qabanayno lagana yaabo inuu isbedelo maalmaha iyo todobaadyada soo socda.

Ilaa iyo Hada iskuulada oo dhami way furan yihiin, wayna la socdaan, way degan yihiin, diirada ayeyna ku hayaan, waxayna si cad u muujinayaan baahida loo qabo in la wada shaqeeyo. Haddii loo baahdo in iskuulada laga kala dareero ama la xiro, kooxdeena tiknoolojiyadda macluumaadka ayaa la shaqeyneysa kooxdeena manaahijta iyo waxbarashada sameynta qorshayaal badan si loo hubiyo sii wadida waxbarashada oo ay kujirto barashada fog ee elektarooniga ah iyo in loo qaato qalabka waxbarashada guryaha. Xiritaanka dugsiga wuxuu ku saleysanaan doona talooyinka ay soo jeediyaan Waaxda Waxbarashada Gobolka iyo Waaxda Caafimaadka ee Degmada Erie.

Shaqaaluhu waxay soo gudbin doonaan dhammaan codsiyada iyo macluumaadka ku saabsan safarada iskuulka maalgeliyey (safarada gaagaaban, safarka fasaxa gu'ga, kuwa shirarka loo aado). Macluumaadka waxaa lala wadaagi doonaa saraakiisha caafimaadka si loo qiimeeyo loona go'aamiyo daruuriga iyo / ama amniga safarka iyo / ama suurtagalnimda in (14-maalmood) la karantiilo marka laga soo laabto. Waxaan sidoo kale si xoogan ugu dhiirigelinaynaa qoysaska iyo shaqaalaha inay soo sheegaan qorshayaasha u degsan ee safarka fasaxa gu'ga

Fadlan fiiri boggeena internetka maalin kasta ee Waaxda Caafimaadka ee Degaanka Erie, Waaxda Caafimaadka New York, Xarunta Xakamaynta Cudurrada, iyo cusbooneysiinta xogta xiriiriyaha Ururka Caafimaadka Adduunka. Waan kaaga mahadcelinayaa samirkaaga waqtigaan aan caadiga aheyn, waana kugu kalsoonahay inaad sii wadi doontid in aad nala wadaagto fikradahaaga iyo waxyaabaha aad ka welwelsan tahay.

Salaan daacad ah,

Dr. Kriner Cash  
Kormeeraha Guud

*"Putting Children & Families First to Ensure High Academic Achievement for All"*